



KOOXDA IDG EE  
DMCC

120 Emarat Atrium Building, Sheikh Zayed Rd, PO Box 50784, Dubai, UAE

# SIYAASADDA KU AADDAN CABASHADA

Agoosto 2015

NOOCA1.1





## KOONTAROOKKA NOOCA

NOOCA	LA SOO SAARAY	MUALIF	WAXAA IN LA SHAACIYO AMRAY
1	AGOOSTO 15	G WINTER	I GORDON
1.1	DISEEMBAR 20	G WINTER	I GORDON



## TUSMO

<b>SIYAASADDA KU AADDAN CABASHADA .....</b>	<b>2</b>
1. <b>Baaxadda .....</b>	<b>2</b>
2. <b>Ballanqaadka IDG .....</b>	<b>2</b>
3. <b>Heerarka Anshaxa, Aadaabta iyo Waxqabadka .....</b>	<b>2</b>
4. <b>Habraaca Cabashada.....</b>	<b>3</b>
4.1. <b>Marxaladda 1aad – Dib u eegidda Maareeyaha Qof Shaqaale ah .....</b>	<b>3</b>
4.2. <b>Marxaladda 2aad – Kormeeraha Maareeyaha Qof Shaqaale ah .....</b>	<b>3</b>
4.3. <b>Marxaladda 3aad – Maareeyaha Shaqaalaha IDG .....</b>	<b>3</b>
5. <b>Dhexdhexaadin .....</b>	<b>4</b>



## SIYAASADDA CABASHADA

### 1. Baaxadda

Taladaan soo socota waxay dejinaysaa habraaca shaqaale uu si rasmi ah u isticmaali karo inuu kusoo tebiyo walaac uu ka qabo tacaamul lagula kacay –macnaha cabasho – uu ka qabo wixii xaalad ah oo ku saabsan shaqada la siiyay ee uu qabto. Habraaca ayaa dejinaaya habraac kale kaasi oo cabashadaan ay ku dhageysaneyso maareynta Shirkaddu.

Markii qof shaqaale ah uu doonayo inuu soo gudbiyo cabasho, waxaa la door bidi karaa in cabashada si ku filan loo xalliyo taasi oo aad ugu dhow shakhsiga iyo maareeyihiisa gaarka ah sida ugu macquulsan. Si kastaba ha ahaatee, waa la fahmay in mar kasta aysan macquul ahayn taasi oo balse habraac rasmi ah loo baahan yahay in la xaqiijiyo u xallinta cabashada si degdeg ah oo xaq ah.

Siyaasadda Cabashada kuma ay jirto tillaabada edbinta ah ee ay shirkaddu ka qaaddo qof shaqaale u ah.

### 2. Ballanqaadka IDG

IDG gebi ahaanba wey ka go'an tahay arrintu, si daacad ah oo heerarka ugu sarreeya ee habdhaqanka anshaxa waafaqsan.

IDG way ka go'an tahay inay ula tacaamusho dhammaan shaqaalaha si xaq ah, oo hufan oo isu dheellitiran, oo ah eex la'aan ama nin jecleysi la'aan.

### 3. Heerarka Anshaxa, Aadaabta iyo Waxqabadka

IDG waxay fileysaa in shaqaalaha iyo dadka haysta qandaraas hoosaadka ay waafaqaan heerarka anshaxa iyo aadaabta aasaasiga ah, iyo waliba heerarka waxqabadka ee qeybta ka ah dawrka loo shaqaaleysiiyay inay qaataan. Waa heerkaan waxqabadka guud kuwa IDG ay dib u eegidda ku samayn doonto. Heerarka looga baahan yahay shaqaalaha IDG waxaa lagu qeexay Buugyaraha Shaqaalaha, iyo gudaha qandaraashla shakhsiga kaasi oo sidoo kale faahfaahiya heerarka waxqabadka shaqada ee loo baahan yahay. Haddii la soo koobo, heerarku waa:

- Waxaa lagaa filaayaa inaad tilmaamaha u raacdo si waafaqsan qandaraaskaaga shaqada.
- Waa inaad qaban wax hawl ah oo aan lagu xusin qorshaha ama siyaasadda caymiska ee shirkadda
- Waa inaad taqaano sharciyada maxalliga ah ee munaasabka ah iyo sharuudaha macmiilka Shirkadda.
- Waa inaad xaqiijiso inaad ogaato oo aad fahamto awaamiirta shaqada, awaamiirta ilaalinta, awaamiirta dabka, qorsheyaasha wax u istaagidda ama wax u diyaar garoobidda iyo kuwa arrimaha kadiska ah, Habraacyada Tillaabo Tillaabada ah ee Shaqooyinka Soo Noqnoqda ee Shirkadda, sharuudaha isticmaalka awoodda (RUF) iyo awaamiirta iyo tilmaamaha kale ee ku habboon goobtaada shaqada.





- Waa inaad sida ugu dhaqso badan ee ugu macquulsan adoo isticmaalaya habka ugu dhaqso badan ugu sheegto taliyaha kooxdaada, maareeyaha Mashruuca, Agaasimaha Shirkadda ama Maareeyaha haddii ay kugu dhacdo dhibaato dhanka maamulka, daryeelka ama shaqada ah, adoo siinaya faahfaahin buuxda oo sax ah.

## 4. Habraaca Cabashada

### 4.1. Marxadda 1aad – Dib u eegidda Maareeyaha Qof Shaqaale ah

Qof shaqaale ah oo cabasho qaba waa inuu arrinka u sheego maareeyihiisa gaarka ah durba si afka ah ama qoraal ah (maareyee sida Kormeeraha Ilaalinta).

Haddii arrinka qudhiisu uu khuseeyo qofka shaqaalaha ah maareeyihiisa u gaarka ah, waa in loo cawdaa marka qofka ka sarreeya maareeyaha gaarka ah (sida Maareeyaha Mashruuca Ilaaliya iyo Maareeyaha Shirkadda Dalkaasi u Qaabilsan).

Haddii maareyuhu uusan awoodin inuu arrinka wax ka qabto waqtigaas, cabasho qoraal ah oo rasmi ah waa in la gudbiyo. Maareyuhu intaa kadib waa inuu kusoo jawaabo 2 maalmood oo maalmaha shaqada ah gudahood (waa maalmaha shaqada ee caadiga ah ee maareeyaha). Haddii arrinkan uu shaqeyn waayo, waqti dheeraad ah ayaa la ogolaan karaa haddii labada daraf ay isku raacaan. Jawaabta ayaa bixin doonta sharraxaad qoraal ah oo dhammaystiran oo ah go'aanka maareeyaha iyo qofka racfaan loo qaadan karo haddii wali cabasho la qabo.

### 4.2. Marxaladda 2aad - Kormeeraha Maareeyaha Qof Shaqaale ah

In badan IDG waxay ka fileysaa go'aanka maareyuhu inuu noqdo kama dambeys iyo in arrintu sidaasi ku dhammaato. Si kastaba ha ahaatee, daruufaha qaarkood markii ay jiraan, qofka shaqaalaha ah waxaa laga yaabaa inuu wali yahay mid cabanaaya waxaana uu racfaan ka qaadan karaa go'aanka maareeyaha arrinku khuseeyo.

Racfaanku waa inuu ahaadaa qoraal waana in lagu soo gudbiyo muddo toban maalmood ah gudahood kadib markii la helo jawaabta asalka ah ee laga bixiyo cabashada qofka shaqaalaha ah. Waa in loo diro maareeyaha xiga ee kii hore ka sarreeya (waa maareeyaha ka sarreeya maareeyihii hore)

Maareeyahaasi waxaa uu isku dayi doonaa inuu wax ka qabtoo xalliyo cabashada. Jawaab rasmi ah iyo sharraxaad buuxda ayaa qoraal ahaan lagu soo gudbin doonaa muddo 7 maalmood ah gudaheed.

Markii 'maareeyaha xiga' ee marxaladdaan uu yahay Agaasimaha leh mas'uuliyadda shaqada shaqaalaha, cabashadu waa inay durba u gudubto marxaladda 3aad.

### 4.3. Marxaladda 3aad – Maareeyaha Shaqaalaha IDG

Haddii qofka shaqaalaha ahi uu wali sii wado cabashada, waxaa jiri doona heer kama dambeys ah oo ku saabsan racfaan kaasi oo loo gudbinaayo Maareeyaha Shaqaalaha ee IDG. Racfaankan waa in qoraal lagu gudbiyo waana inuu wato nuqul ah cabashada oo qoraal ah. Qof kastoo shaqaale ah ee doonaya inuu racfaan heerkaan ah qaato waa inuu ku soo gudbiyo racfaankiisa qoraalka ah muddo toban maalmood ah oo maalmo shaqo ah kadib markii la helo jawaabta Marxaladda 2aad. Cabasho waxaa loo gudbin karaa Maareeyaha Shaqaalaha IDG ayadoo lagu dirayo emailkaan soo socda: [grievances@idg-security.com](mailto:grievances@idg-security.com)





Agaasimahaan wuu diyaarin doonaa oo dhageysan doonaa asaga iyo wakiil maareyn oo kale wuxuuna uga soo jawaabi doonaa si rasmi ah oo sharraxaad buuxda leh muddo 20 maalmood oo maalmo shaqo ah.

Haddii cabasho laga keeno maareeye sare (Agaasime, Maareeyaha Dalka Qaabilsan, Kuxigeenka Maareeyaha Dalka Qaabilsan, ama qof la mid ah) cabashada waxaa dhageysanaya Agaasimaha Maareynta.

Ma jiro xaq kale oo loo leeyahay racfaan. Laakiin si kastaba ha ahaatee, markii **labada** darafba ay isku raacaan in xoogaa mudnaan ah la siiyo u gudbinta daraf saddexaad si uu talo uga bixiyo arrinka, heshiisiin uu u sameeyo ama gar qaadid, qabanqaabo ayaa la samayn doonaa si loo helo daraf saddexaad oo lagu wada qanacsan yahay. Guddiga Agaasimeyaasha ee IDG ayaa kiis kiis qarash ugu qoondayn kara sidii gacan looga geysan lahaa qarashka sharciga ee qofka cabashada qaba.

## 5. Dhexdhexaadin

IDG waxay aaminsan tahay in dhexdhexaadin gudaha ah markii cabasho timaaddo ay noqon karto wax baddal ah oo cawimaad badan laga helo baddalkii habraac cabasho oo rasmi ah. Dhexdhexaadin qeyb kama ahan habraaca cabashada ee rasmiga ah ee IDG. Si kastaba ha ahaatee, haddii labada darafba ay isku raacaan dhexdhexaadin, intaa kadib habraaca cabashada waa lasoo afjari karaa si la isugu dayo in cabashada lagu xalliyo wadadaas. Haddii dhexdhexaadintu aysan guuleysan, intaasi kadib hadana waxaa dib loo bilaabi karaa habraaca cabashada. IDG waxay bixin doontaa dhexdhexaadin gudaha ah oo loogu tala galay qof kastoo shaqaale ah kaasi oo doonaya inuu wax ka qabto cabasho la soo tebiyay, waxaana laga yaabaa in daruufo dhif ah markii ay jiraan ay soo qabato dhexdhexaadiye dibadda shirkadda kasocda.

Dhexdhexaadin waa hannaan iskaa ah haddii dhexdhexaadiyuhu uu caawinayo labo ama dad intaas ka badan oo khilaaf uu ka dhexeeyo si ay u heshiiyaan. Heshiis wuxuu ka yimaadaa dadka is khilaafsan, ee kama imaado dhexdhexaadiye. Dhexdhexaadiyuhu wuxuu mas'uul ka yahay hannaanka lagu doonayo in lagu xalliyo dhibka laakiin mas'uul kama ahan natiijada.